Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 5-aad
Documentiga Kul.5-aad/kul.8-aad 05/11/2014

Kalfadhiga 5-aad
Kulankiisa 8-aad Saac,11:15gh.Saac.Xir 02:10gd
Guntinta(Quorum) 148 Xil.
Ajendaha:

1. **Furitaanka Aayadaha Qur'aanka kariimka**
2. **Ansixinta Ajendaha**
3. **Sii wadida dooda wada hadalka Baarlamaanka**
4. **Iyo wixii kale**

Shir-Guddoomiye Guddoomiye Ku=Xigeenka 1-aad Mudane jeylaani Nuur Iikar,

Shirka waxaa furay Guddoomiye Ku/xigeenka 1-aad Mudane Jeylaani Nuur Iikar, waxaana lagu furay Aayadha Qur'aanka Kariimka uuna akhriyay Xil.Sheekh shaacir.

Guddoomiye Ku-1aad wuxuu sheegay in Golaha uu sameysto ajende kadibna laga dodo.

Xil. Maxamed X/llaahi Fadhayo wuxuu sheegay in ay matalaan shacabka, loona baahan yahay in runta la sheego, hadii albaabada la xirto cidda gaarsiineyso waa kuwee.

Xil. Maxamed Cabdi xeyr

Xil. Maryan Cariif Qaasim

Xil. jeysoow.

Waxay Xildhibaanadaasi isku fikrad ka yihiin in ajendaha 1-aad laga dhigo Nekoloskey qaraarna laga soo saaro wixii uu sameyay iney meel kadhac ku tahay Baarlamaanka Soomaaliya apologize uu ka bixiyo.

Xil. C/rashiid Xidig, wuxuu soo jeediyay in ajendaha lagu daro xaaladda hadda taagan, waa in arinta cakiran xal loo helaa.

Xil. Bekos wuxuu soo jeediyay in maalin ama lobo maalmood la qabto Golaha shir gaar ah, in la note gareeyo wixii dhibaato oo jira.

Xil. Muuse Sheekh Cumar,wuxuu ka hadlay sugidda arimaha amniga iyo in lasoo habeeyo ciidamada, iyo in lahabeyo qaabka xisaab-xirka miisaaniyadda , in la ilaaliyo daryeelka iyo xasaanadda Xildhibaanada.

Xil. Maxamed ISmaaciil Shuuriye, wuxuu soo jeediyay sadex ajende,

1. Dhaqan galinta shuruucda Baarlamaanka Xildhibaanada iyo Guddoonka iyo shuruudaha lagu hishiyay ee fulinwaayeen oo aan jirin 1 Xildhibaan oo sharciga la waafajiyay
2. Dastuurka waa arimaha is qab qabsiga ka dhaca
3. Beesha caalamka waxay dhaliileyn Baarlamaanka wuxuu soo jeediyay in laga soo saaro qaraar si cod ahna loo qaado.

Xil. poin of order sareedo, waxay sheektay in Baarlamanaaka uu ayahayn hal layskana ilaaliyo in lakala go waxayna soo jeedisay in la noqdo Soomaali weyn wadani ah oo ay leeyihiin 18 Gobol ee uu ka kooban yahay wadanka, waxay kaloo sheektay in nokoloskey uu ka bixiyo apolojize. Waxay kaloo ay sheektay in ay hadiyad u wado guddoomiyaha Golaha Shacabka kana keentay African Unuin.

Kadib, Guddoomiyaha Golaha Shacabka uu shir-guddoominayay Golaha wuxuu sheegay in ajende la sameeyo si looga dodo loona sameeyo qodob qodob ajendaha la meel mariyo.

Xil.Dalxa wuxuu sooo jeediyay in Baarlamaanka loo ekeysiiyo baarlamaanada aduunka , waxaa kaloo jirta in aan anaga is hagaajino wixii dhexdeena iyo in cadaalad darada ka jirta dhamaan hey'adha Dowladda wax laga qabto.

Xil. Muuse Sheekhn Cumar wuxuu soo jeediyay in ajendahan 1-aad laga dhigo.

1. La xisaabtanka Dowladda iyo sareynta sharciga.
2. Nidaamka maaliyadda ka jira iyo sida aan ula xisaabtami laheyn
3. Arimaha amniga sida hishiisyada caalimiga iyo midka Turkiga
4. Xasaanadda Xildhibaanada dhinacayadeeda kala duwan

Xil. Axmed Cabdulle wuxuu sheegay ,In qaabka sharciga ee Baarlamanka wax laga bedelo .In qaabka amniga ee Baarlamanka ma aha mid joogto ah ,wuxuu soo jeediyey in Ajendaha lagu daro. In Nikolas Kay oo Baarlamanka Ceebeeyey in laga dhigo Ajendaha

1. In xuquuqda Baarlamankii hore la soo saaro.
2. Badda
3. Hishiiskii Dowladahii hore aan la galnay
4. Sida loo maareeyay deeqdii lageed ee la helay

Xil. samaan wuxuu soo jeediyay ku dhaqanka Dastuurka iyo shuruucda dalka u dagsan in lagu daro ajendaha.

Xil. C/naasir Gaarane, wuxuu soo jeediyay in ajendaha lagu daro Nikoloskey jaaifadii uu u geystay Golaha Baarlamaanka, wuxuu kaloo sheegay in dadka ay nagu dhibtoodeen wadada Baarlamaanka oo xiran taasna waxay iska horkeeneysaa Dowladda iyo Shacabka.

Xil. C/fitaax Mataan, wuxuu soo jeediyay

1. In waqtiga xasaasiga ma haboon tahay mooshin
2. Maxay Baarlamaanka uga qaadan la yihiin mooshinka mooqof cad.
3. In Nikoloskey uu ka bixiyo cudurdaar
4. In la dhooro kitaabkii lagun dhaartay
5. Iyo in aan ilaalino sharafta Baarlamaanka.

Xil. Xamsa waxay soo jeedisay in ajendaha lagu daro

1. xaadirinta Xildhibaanada laga 07:00 aroornimo
2. in xiliga shirka uu socdo aan la bixin
3. waa in la ilaaliyaa xushmada Guddoonka
4. in talada loo dhiibo Guddoonka lana midoobo

Xil. Xusmaan Muqtaar wuxuu sheegay iney yihiin Baarlamaan Federaalka Soomaaliya waxaana waajib nagu inaan ilaalino sharafteena Baarlamaanka , iyo in laga dodo cadaalad darada jirto Gudoonka iyo Baarlamaanka.

Xil. C/risaaq Cusman Jurile,wuxuu soo jeediyay in lagu daro ajendaha dhowr qodob oo kala ah.

1. in laga hadalno shaqada Baarlamaanka,
2. Heybadda Baarlamaanka iyo Xildhibaanada
3. Midnimada Baarlamaanka in laga dhigo ajendaha 1-aad, waxaa soo galaaya mushkiladda jirta, Hay'adaha Xukuumadda.
4. Xuquuqda Baarlamaanka iyo Heybadooda

Xil. Axmed Xusmaan Daqare, wuxuu soo in lagu daro ajendaha.

1. Xiriirka caalimiga Dibadda In ay u gafaan Baarlamaanka
2. In wixii qilaaf ah la xaliyo layskuna keeno madaxda Dalka u sareyso M/weynaha iyo R/wasaaraha.

Xil. Dr. Cilmi, wuxuu soo jediyay in ajendaha lagu daro

1. In la hormariyo Sumcadda Baarlamaanka Qaraarna laga soo saaro safiirka Nikoloskey
2. In la xaliyo qilaafka jiro loona xaliyo qaab xusub
3. Iyo in la dhiso Guddiga adeega Baarlamaanka si aan u hormarino Baarlamaanka.

Xil. Maxamud Axmed Dhuux, wuxuu sheegay in in ajendaha lagu daro

1. In cadaalad loo sameeyo Ha'adaha Dowladda
2. In loo sameeyo shuruuc gaar ah Caasimadda Muqdisho.

Xil. Axmed Taaw, wuxuu soo jeediyay in ajendaha lagu daro

1. Habacsanaanta Baarlamaanka
2. In laga gudbo qilaafaadka badan ee soo noq-noqda
3. In faragalinta laga ilaaliyo Baarlamaanka
4. Shaqaalaha badan ee ajanabiga Dalka jooga
5. Iyo in aan laga hadlin idaacadaha
6. Shaqaalaha layska keenaayo Baarlamaanka

Xil. C/llaahi Coonka, wuxuu soo jeediyay in ajendaha lagu daro

1. In lasoo caliyo nidaamkii hore ee shanta maalmood si shaqo dhab ah loo qabto
2. In la sameeyo guddi kormeera shaqada Baarlamaan

Guddoomiyaha wuxuu sheegay inuu ka soo shaqeyn doono caawa iyo bari ajendaha. kadibna la keeni doono maalinta sabdida.

Poin of order,

Xil. Xaaji Cabdi, wuxuu sheegay in mooshinka aan lagu furin Golaha hortiisa oo la hakiyaa,

Xil. Dhalxa wuxuu sheegay in arinta Nikolskey ay leedaha Guddiga Arimaha Dibadda ee Baarlamaanka, wuxuuna soo jeediyay in layku ixtiraamo.

Xil. Cabdi dhucxulow, wuxuu sekengareeyay xil.pors. Dhalxa iyo in wixii dhib ku ah Golaha la ilaaliyo. Haddii arintaan lasii wad wado waxay dhib ku keeneysaa Dipolomaasiyada, wuxuu soo jeediyay in hadda lakala fog yahay dadka wax ku oolka ah yaan looga sii darin.

Xil. Dr. Cilmi wuxuu sheegay in si kasto aan u liidano aanan iibsanin sharafteena.

Xil. Jurile wuxuu sheegay in ay yihiin qaran safiirka Nikoloskey wuxuu madax ka yahay 250 Dowladood in la fariisto markey noqoto, ajendo dhibaato faraban leh in badan waxay leeyihiin waa sax, in kalane waxay leeyiniin waa qalad, waxaa loo baahan yahay in la helo sharci dajiyaal. $560 Milyan doolar ayaa ku baxda Ciddamada ajaanibta, bishii 25milyan oo Doolar ayaa lagu bixiyaa $20,000 oo Doolar waxay ku baxdaa lojistikada iyo shidaal, askariga nabad-illaaliyaasha wuxuu qaataa $1000 iyo dhoor Doolar, wuxuuna soo jeediyay iyadoo aan laga baaraan dagin layskuna imaanin arintaa iyada ah in waxba laga soo saarin.

Xil. Maxamed karaama, wuxuu sheegay Dalka masaalixdiisa siyaasada Dalka, kaalmada iyo soo faragalinta soomaaliya isku hal maha,

Xil. kulilihi wuxuu sheegay in uu 14 sano uu ahaa Xildhibaan uuna jiro dan dadareen xoog leh fadhiya kadibna loo saaro team kasoo shaqeeya Guddina loo saaro arinta Nikoloskey iyo in ajendaha lagu daro.

1. Xuquuqdii hore ee Baarlamaankii hore iyo Shaqaalihiisii hore

Intaa Guddoomiyaha wuxuu sheegay in la ilaaliyo midnimada Baarlamaanka iyo in aad idinkaba isku taxluujisaan sidii qilaafkaan lagu dhameynlahaa.

Shir-Guddoomiyahe Guddoomiyaha Golaha Mudne Muxumad Sheekh Cusmaan Jawaari oo shir-Guddoominaayay kalfafhigii 5-aad Kulaniisa 8-aad uu xiran yahay saacadda markey ahayd 0210gd.